

GUNOYINKA AYAA SII SOCDA

Xafiiska Maxkamada Maamulka waxay heli doontaa dalabkaaga, ama wixii macluumaad ah ee ku saabsan, sii socodka gunooyinka inta la sugayo natiijada rafcaankaaga. Dalabkaagu waa in marka hore loo diraa hay'ada ku telinaysa in meesha laga saaro ama la yareeyo gunooyinkaaga. **Ma amarno in lasii wado gunooyinka iyada oo hay'ada (caadiyan Waaxda Degmada) ay si khaldan u kuugu diiday inay ku siiso.** Shuruucda sii wadida gunooyinku way ku kala duwan yihiin barnaamijka gunooyinka shacabka oo kasta. Si guud marka loo hadlo, hay'ada dawladu waxay sii wadi doontaa gunooyinka hadii rafcaankaagu uu soo gaadho kahor taariikhda hay'adu ayna kuu sheegin inay joojinayso ama yaraynayso gunooyinkaaga. Taariikhdaas waxa ay noqonaysaa wixii ka horeeya mudada ay uu ku eeg yahay rafcaanka in la qaato. Laakiin, waxaa jira waxyaabo laga soo reebo. Tusaale ahaan, gunooyinka lasii wado ee food stamps lama heli karo wixii ka danbeeya mudada ay ku eeg tahay ee hore loo xaqiijiyay, oo gunooyinka lasii wado lama helikaro hadii arjiga gunooyinka la diido.

Hadii hay'adu diido inay kuusii wado gunooyinka oo aad weli u aragto inaad xaq u leedahay inaad hesho, waxa aad dalban kartaa amar in lagu sii wado ah gunooyinka. Dalabkaagu waa inuu noqdaa qoraal oo waa inuu sharaxaa cida aad kala hadashay hay'ada dawlada iyo waxa ay ka yidhaahdeen dalabka. Hadii aanad sidaa hore u samaynin, waa inaad noosoo dirtaa nuqul wargelinta aad heshey ah ee kuu sheegeysa in gunooyinkaaga la yarayn doono ama la joojin doono. Laguuma soo saari karo amar sii wadid gunooyinka ah hadii ayna jirin wargelintani. Xaakunka sharciga maamulka ("ALJ") waxay eegi doonaan dalabkaaga oo waxa uu soo saari doonaa amar hadii ay ku munaasab tahay sida ay dhigayaan shuruucda sii wadida gunooyinku.¹

Wixii gunooyinka ""dhaqaalaha waayeelka" (Colorado Works, TANF, OAP, AND, iwm.) shuruucda waxay yihiin kuwa Qaybta 3.830.24 E., 9 CCR 2503 ee: <http://bit.ly/1tJsHNB>. Wixii food stamps ah, Shuruucda waxay yihiin kuwa Qaybta B-4410.2 iyo B-4240, 10 CCR 2506-1 ee: <http://bit.ly/1nlf3j0>. Shuruucda Medicaid waxay yihiin kuwa Qaybta 8.057.5, 10 CCR 2505-10 ee: <http://bit.ly/1p9PEtf>. Shuruucdu sidoo kael waxaa laga eegi karaa websaytka Xoghayaha Gobolka Colorado: <http://www.sos.state.co.us/CCR/Welcome.do>.